# Manfacyada Dowladda ee Dhalinyarada

Government Benefits for Youth

## Muhiim!

**OGOW:** Tani waa dhinac sharciyada ah oo dhib badan. Waa muhiim inaad kala tashato qareen arrintaada gaarka adiga kuu ah.

Hadii aadan deganaansho sharci ah oo rasmi ah **aadan** haysan (green card) ama aadan ahayn MuwaadinU.S. HA codsan manfacyada dowlada adigoon qareen la tashan.

Ka reebiddu waxa weeye waxa aad codsan kartaa barnaamij kaar daryeel caafimaad ah oo uu gobolku leeyahay oo la yiraa MinnesotaCare. Sharci ha haystaan ama yeysan haysanine, da' yartu mar walba xaq ayey u leeyihiin kaarka MinnesotaCare. Eeg warqadayada xogta aruursan ee [What is MinnesotaCare and Am I Eligible?] *(ingiriisi kaliya)*

## Waa aan ka yar ahay 18.
## Ma ka heli karaa caawimaad barnaamijyada dowlada?

Hadii aad ka yar tahay 18 sanno, waxaa dhici karta inaad ka heli karto caawimaad barnaamijyada manfacyada dowlada iyadoo hadba ku xiran xaaladaadda. Barnaamij walba waxa uu leeyahay xadad dhanka dakhliga ah. Taa macnaheedu waa lacag badan kuma soo geli karto wax badan oo hanti ahna ma lahaan kartid.

## Hadii aad la nooshahay waalidkaa, ama qof sharciyan mas'uul kaa ah (amar maxkamadeed), ama ehelkaa ah, aadna ilmo haysto

Waxaa dhici karta inaad heli karto:

- Lacagta cadaanka ah ee MFIP oo bil walba ah (Minnesota Family Investment Program)
- SNAP (Barnaamijka Gargaarka Kaabida Nafaqada – cuntada ah)
- MA (Kaar Caafimaad)
- WIC (Haweenka, Dhallaanka, Ilmaha). Waad heli kartaa WIC hadii aad uur leedahay.



Dakhliga iyo hantida waalidkaa ayaa la xisaabiyaa barnaamijyada qaarkood kolka la go'aansanayo xaq u yeeladka barnaamijyada.

## Hadii aad la nooshahay qof aan qaraabo kula ahayn ama aan mas'uul kaa ahayn

Waxaa dhici karta inaad hesho:

- SNAP (Barnaamijka Gargaarka Kaabida Nafaqada –cuntada ah)
- MA (Kaar Caafimaad)
- WIC (Haweenka, Dhallaanka, Ilmaha). Waad heli kartaa WIC hadii aad uur leedahay

Waxa dhici karta inaad heli karto waxyaabahaa ilmo hayso ama ha haysane. Hadii qofka aad la nooshahay uu haysto Ku Wareejin Mas'uuliyadii Waalidka (DOPA), laakiin aydnaan qaraabo ahayn, kama heli kartid lacagta cadaanka ah ee bil walba la isa siiyo MFIP.

## Hadii aad meel kale oo aan guriga ahayn aad ku nooshahay aadana ilmo haysan

Waxaa dhici karto inaad hesho:

- Lacagta cadaanka ah ee bil walba la isa siiyo barnaamijka Gargaarka Guud (GA)
- SNAP (Barnaamijka Gargaarka Kaabida Nafaqada – cuntada ah)
- MA (Medical Assistance)

## Hadii aada tahay dhowr iyo toban jir ilmo haysta oo qoyskaaga dibada uga nool iyadoo ay sababtu tahay tacadi

Hadii aada tahay dhowr iyo toban jir ilmo haysta oo qoyskaaga dibada uga nool iyadoo ay sababtu tahay tacadi jirka ama niyada ah oo uu geystay waalid, qof sharciyan mas'uulkaa ah ama ku haya, waxaa dhici karta inaad ka hesho:

- Lacagta cadaanka ah ee MFIP ee bil walba ah Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (MFIP)
- SNAP (Barnaamijka Gargaarka Kaabida Nafaqada – cuntada ah)
- MA (Kaar Caafimaad)
- WIC (Haweenka, Dhallaanka, Ilmaha)

## Hadii aada tahay dhowr iyo toban jir aadna doonayso inaad hesho manfacyada MFIP ka

Waa khasab inaad la nooshahay waalidka ku dhalay ama ku soo korsaday, qof mas'uul kaa ah, ama dad kale oo waaweyn oo ehelkaa ah, ama deegaan dad waaweyni maamulo, aan ka ahayn:

- Inaadan ogayn meesha ay jiraan waalidkaa, qofka sharciyan mas'uulka kaa ah ama qabaabadaada kale
- Waalidkaa, qofka sharciyan mas'uulka kaa ah ama qabaabadaada kale ee dadka waaweyn ahi aysan kuu ogolayn inaad la noolaato iyaga.
- Aadan la noolayn waalidkaa iyo qofka mas'uulka kaa ah ugu yaraan muddo 1 sanno ah ka hor dhalashada ilmahaaga ama codsiga manfaca MFIP, ama
- Meel aad ku noolaato oo dad waaweyn oo ku gargaarayaa ay joogaan aysan ka jirin degmada aad ku nooshahay

Wixii kale ee la saamaxay, wac Youth Law Project *(Mashruuca Sharciga Dhallinyarada)* (877) 696-6529 ama youthlawproject@mylegalaid.org.

Waxaa iyana dhici karta inaad hesho hayn ilmaha ah oo kharashka lagaa caawiyo inaad bixiso.



## Hadii adiga ama ilmahaagu uu naafo yahay

Waxaa dhici karta inaad ka hesho manfacyada naafada Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security Administration), Waxaa jira 2 nooc oo barnaamijyada naafada ah:

- Kaabaha Dakhliga Danyarta (SSI)
- Caymiska Naafada, Hawlgabka, Nolol ku dambeeye (RSDI).

Hadii aad xaq u yeelato mid ka mid ah barnaamijyadaa waxa aad ka heli kartaa manfac lacag cadaan ah oo bil walba ah. Waxaa iyana dhici karta inaad hesho SNAP (Barnaamijka Gargaarka Kaabida Nafaqada – cuntada ah) iyo MA (Kaar Caafimaad)

Hadii aad qaadato SSI aadna ilmo haysato, waxa aad ka heli kartaa manfac lacag cadaan ah bil walba ah Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota ee (MFIP). Hadii ilmahaagu uu qaato SSI, waxa aad ka heli kartaa manfac lacag cadaan oo bil walba ah MFIP.

## Hadii labaada waalid midkood uu geeriyooday

Waxaa dhici karta inaad ka hesho manfacyada Hawlgabka, Nolol ku Dambeeyaha, Barnaamijka Caymiska Naafada (RSDI) da ee Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security)

## Sidee ayaan caawimaad uga heli karaa barnaamijyadaa?

Waxa aad u baahan tahay inaad codsato barnaamijyada aan uga hadalnay warqadan xog aruurinta.

Ka codso Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security) SSI iyo RSDI. Wac 1-800-772-1213. Hadii aad dhago la' dahay ama aad dhaga-culus tahay, wac lambarkayaga lacag la'aanta ah ee (TTY) ee 1-800-325-0778. Waxaad kaloo ka codsan kartaa khadka (online) ka ee www.ssa.gov.

Ka codso dhamaan kuwa kale oo dhan waaxda gargaarada dhaqaale ee degmadaada. Wac telefanka akhbaarta ee degmadaada ama gal shabakada www.dhs.state.mn.us. Tani waa shabakada (website), Waaxda Adeegyada Bulshada, waxaa ku jira liis ay ku qoran yihiin lambarada degmada lagala helo shabakada (website).



2-1-1 waa il fiican oo laga helo caawimaad iyo akhbaar. Ka wac 2-1-1 gobolka oo dhan, dhambaal (text) ziib koodkaaga ugu dir iyaga lambarka ah 898-211 si aad u ogaato wixii caawimaad ah ee ka jira deegaanka ama kala hadal khadka (online) ee ah https://www.211unitedway.org/about-211/somali/.

Macluumaad dheeraad ee *Barnaamija MFIP ee Waalidiinta da'doodu ka yartahay 18 sano*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**